JAMHUURIYADDA
FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
SOOMAALIYA

# BARNAAMIJKA XUKUUMADDA

2022-2026

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
08-2022

SOOMAALI

# HESHIIS AH

DUNIDANA

# HESHIIS LA AH

MUDANE XAMSE CABDI BARRE
RA'IISUL WASAARAHA XUKUUMADDA
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

08 - 2022

# TUSMO

**I. MAHADNAQ IYO HORUDHAC** 1

**II. TIIRARKA BARNAAMIJKA**

- **TIIRKA 1aad:** DIB-U-XORAYNTA IYO SUGIDDA AMNIGA 3
- **TIIRKA 2aad:** CADAALAD IYO GARSOOR MADAX BANAAN 5
- **TIIRKA 3aad**: SOOMAALI HESHIIS AH 7
- **TIIRKA 4aad**: ISKU FILNAANSHO DHAQAALE 11
- **TIIRKA 5aad**: HORUMARINTA ARRIMAHA BULSHADA 14
- **TIIRKA 6aad**: SOOMAALI HESHIIS LA AH DUNIDA 16

**III. GUNAANAD** 17

**IV. LIFAAQ 1:**

- QORSHE HOWLEEDKA GOLAHA WASIIRRADA 2022-2026 XJFS 18

# MAHADNAQ & HORDHAC



Ugu horreyn, mahad oo dhan waxay u sugnaatay Ilaahay Subxaanahu Wa Tacaalaa. Marka labaad, waxaan uga mahad-celinayaa Guddoonka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Xildhibaannada sharafta leh ee kalsoonida buuxda i siiyey taariikhdu markay aheyd 25kii Juun 2022. Waxaan sidoo kale uga mahad-celinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xasan Sheekh Maxamuud kalsoonidii uu iigu magacaabay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya 15-kii bishii Juun 2022; ina siiyey fursaddan qaaliga ah oo aan ugu adeegayo ummadda Soomaaliyeed.

Guddoonka iyo Xildhibaannada sharafta leh;

Anigoo idiinka mahad-celinaya fursaddan qaaliga ah ee aad i siiseen in aan mar labaad idin hor-imaado si aan idiin weydiisto codka kalsoonida ee Golaha Wasiirrada magacaaban, waxaa sharaf wayn ii ah in aan maanta idin hor keeno Xubnaha Golaha Wasiirada cusub ee aan soo xulay. Soo-xullidda Xubnaha Golaha Wasiirrada magacaabani waxay ka tarjumeysaa baahiyaha kala duwan iyo arrimaha hortabinta u leh dalka iyagoo buuxiyay shuruudihii dastuuriga ahaa. Xubnahaan waxaa lagu soo xulay hannaan ku saleysan wada-tashi, aqoon, karti, khibrad, waayo-aragnimo iyo hufnaan u fududaynaysa in ay gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah, una adeegaan shacabka Soomaaliyeed.

Mudanayaal iyo Marwooyin, Gudoonka iyo Xildhibaannada sharafta leh;

Waxaa magacyada xubnaha Golaha Wasiirrada magacaaban la socda Barnaamijka ay Xukuumaddu ku shaqeyn doonto ka dib marka aad siisaan codka kalsoonida, si ay u guttaan waajibaadkooda qaran. Barnaamijkani wuxuu saldhig u yahay qorshaha hawl maalmeedka Xukuumadda, oo ay soo diyaarin doonaan Golaha Wasiirrada marka ay guda-galaan hawlahooda.

Anigoo ka duulaya aragtida Madaxwaynaha JFS ee ah “Soomaali heshiis ah, dunidana heshiis la ah” iyo heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran ee 12kii Juun 2022, barnaamijka Xukuumaddaydu waxa uu qeexayaa arrimaha mudnaanta u leh Xukuumaddayda iyo sidii horumar la taaban karo loo gaarsiin lahaa dalka iyadoo lagu salaynayo Qorshaha Horumarinta Qaranka.

Waxaana kamid ah:

1. Sugidda amniga, dhamaystirka hannaanka amniga qaranka iyo la dagaallanka argagixisada;
2. Xaqiijinta hannaan garsoor madax bannaan oo hufan kuna dhisan sharci;
3. Dardargelinta, qabyo-tirka iyo dhameystirka dastuurka KMG;
4. Hirgelinta iyo horumarinta arrimaha federaalaynta iyo daadejinta dowladnimada;
5. Xaqiijinta dib u heshiin siyaasadeed iyo mid bulsho;
6. Dardargelinta wada hadallada Dowladda Federaalka iyo Maamulka Somaliland;
7. Hirgelinta nidaam doorasho mideysan oo dimuqraadi ah;
8. Hirgalinta hiigsiga isku filaansho dhaqaale;
9. Horumarinta maamul-wanaagga iyo isla xisaabtanka;
10. Horumarinta arrimaha bulshada iyo adeegga dadwaynaha;
11. Hirgalinta gaaritaanka xal waara oo lagu cirib tirayo saamaynta musiibooyinka soo noqnoqda oo ay ugu horreyso abaaraha haatan taagan;
12. Horumarinta iskaashiga iyo xiriirka arrimaha dibadda.

Si aynu Barnaamijyadaan wax la taaban karo uga qabanno waxaan dib u qiimayn doonnaa qorshayaashii horay u jiray, waxaan fikir ku biiirin doonnaa dadaalladii socday, waxaanan wax ka baran doonnaa casharradii horay loo soo maray iyadoo aan ka baaraan dagayno arrimaha siyaasadda, amniga, cadaaladda, dhaqaaalha, iyo bulshada ee guul noo horseedi kara iyo kuwa ay tahay in dib u eegis lagu sameeyo.

Guddoonka iyo Xildhibaanada sharafta leh,

Waxaan si xushmadi ku dheehantahay idiinka codsanayaa in aad ii ansixisaan Golaha Wasiirrada magacaaban, idinka oo ku saleynaya in ay buuxiyeen shuruudihii dastuuriga ahaa, leeyihiin waayo-aragnimo, aqoon, hufnaan, karti iyo shakhsiyadba, isla markaana aad qiimayseen Barnaamijka Xukuumadda aan halkan idiinku soo gudbiyay, qoraalka Barnaamijka Xukuumadda waxaa ku qeexan halbeegyada xukuumadda hortabinta u leh oo ku salaysan xaaladda maanta dalkeennu marayo isla markaana higsanaya guulo wax wayn ku soo kordhin doona dadaalka aynu ugu jirno dib u dhiska dalkeenna.

Waxaan aaminsanahay howsha iyo caqabadaha na hor-yaalla in aan kaga gudbi doonno iskaashi, midnimo iyo wadashaqayn, si loo helo "Soomaali heshiis ah, dunidana heshiis la ah".

Ugu dambeyntii, waxaan idiinka mahad-celinayaa fursadda aad i siiseen iyo kal-fadhiga aan idin kala soo qeyb-galay.

Wadashaqeyn Wacan,
Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Mudane: Xamse Cabdi Barre

# TIIRARKA BIRNAAMIJKA

## TIIRKA 1aad: DIB-U-XORAYNTA IYO SUGIDDA AMNIGA

Halbeegyada hortabinta u leh Barnaamijka Xukuumadda Ra'iisul Wasaare **Xamse Cabdi Barre** waxaa ugu horreeya dib-u-xoraynta deegaannada ay ka dhaq-dhaqaaqaan kooxaha argagixisada iyo xaqiijinta Soomaaliya amni ah, xasilloon oo gaarta nabad waarta.

Amnigu waa udub dhexaadka nolosha, la'aantiisana lama gaari karo wax horumar ah, sidaas awgeed, sugidda amnigu waa waajibka mudnaanta koobaad leh ee saaran dowladda, waana midka Wasaaradaha iyo Hay'adaha amniga lagula xisaabtami doono. Annagoo tixgalinayna wax alla wixii dadaal ahaa ee horay loo qabtay ayaan haddana waxaan abbaari doonnaa dhabbihii lagu heli lahaa dalka oo amni ah, xasilloon, xorna ka ah argagixiso, colaad, iyo dulmi.

Hadafka Xukuumaddu waa in ay xaqiijiso in muwaadin kasta oo soomaaliyeed uu xor ka noqdo cabsi iyo khatar ku timaadda naftiisa, maalkiisa, sharafkiisa, xuquuqdiisa iyo xorriyadiisa taas oo ay u siman yihiin dadka oo dhan. Dhanka kale, Xukuumaddu waaxay xil iska saaraysaa xaqiijinta nabadgalyo ka hirgasha dalka oo idil, (bad iyo barri, miyi iyo magaalo), nabaddaas oo cirib tirta cabsi iyo dulmi.

Wasaaradaha kala duwan ee Xukuumaddayda iyo Hay'adaha Dowladdu waxay hirgalin doonaan adeeg hufan oo dalka u horseeda isbaddal amni wanaagsan. Xukummadda waxaa dhaqan u noqon doona wax qabad, waxaana lagu qiimayn doonaa horumarka aan ka gaarno dib u xoreynta iyo sugidda amniga dalka.

Wasaaradaha, Hay'adaha amniga iyo saraakiisha u xil saaran howlaha sugidda amniga waxaa la fari doonaa in ay dajiyaan siyaasad amni oo qaran, qorshe iyo istraatiijyado wax ku ool ah oo qeexaya shaqada sugidda amniga ee dalka. Siyaasadda amniga waa in diiradda lagu saaraa gaaritaan siyaasad xasiloon, tayaynta ciidamada qaranka, helista xog iyo xuuraan looga hortegi karo falalka amni darro ee lidka ku ah shacabka, lana fulinayo barnaamijyo dib u xorayn ee deegaannada ay joogaan argagixisadu.

Tiirka Dib-u-xoraynta iyo Sugidda Amniga waa tiir ka mid ah tiirarka saldhigga u ah Barnaamijka Xukuumadda iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka. Tiirkani wuxuu hormuud u yahay hagidda, isuduwida, la socodka, iyo qiimeynta qorshaha dib u xoreynta iyo sugidda amniga dalka. Sidoo kale Tiirku wuxuu xoojinayaa dib-u-dhiska iyo tayaynta hay'adaha amniga ee labada heer ee dowladda (Federaal iyo Maamul Goboleed), wuxuuna si dhow u la shaqeynayaa

wasaaradaha, hay'adaha dowladda iyo beesha caalamka.

Tiirku wuxuu xoojiynayaa hannaanka korjoogteynta wasaaradaha ay ku leeyihiin hay'adaha hoos yimaada.

> *"waxaan xoogga saari doonnaa in meelaha nabadda ah la sii xoojiyo, meelaha aan nabadda ahayna laga shaqeeyo sidii nabad looga dhigi lahaa."*

Xukuumaddu waxay ka shaqayn doontaa in la sameeyo dadaaal dheeri ah oo lagu abaabulayo qeybaha kala duwan ee bulshada. Waxaa waajib ah in madaxda heerarka kala duwan ee dowladda (Federaal iyo Maamul Goboleed), ururrada bulshada, haweenka, dhalinyarada iyo culimaa'udiinka, dhammaantood ay si wadajir ah isaga kaashadaan fulinta qorshaha dib u xoreynta, sugidda amniga iyo xasilinta dalka oo dhan.

Waxaan ogsoonnahay in amni-darrada ka jirta dalka ay kala saameyn badan tahay marka la eego degaannada dalka, sidaa darteed waxaan xoogga saari doonaa in meelaha nabadda ah la sii xoojiyo, meelaha aan nabadda ahayna laga shaqeeyo sidii nabad looga dhigi lahaa.

Xukuumaddu waxay muhiimad gaar ah saaraysaa qoondeynta dhaqaale ku filan howlaha dib u xoraynta gobollada dalka iyo sugidda amniga guud ee dalka. Isla markaasna, Xukuumaddu waxa ay meelmarin doontaa qorshayaal lagu go'doominayo cadowga, kuwaas oo ka saameyn doona dhanka dhaqaalaha, isu socodka, xakamaynta hubka iyo ilaalinta xuduudaha.

Xukuumaddu waxay la shaqayn doontaa Culimada Soomaaliyeed si loo hirgaliyo wacyigelin bulsho oo ka jawaabaysa fasiraadaha qaldan ee argagixisadu ay ka bixiyeen diinteenna suuban, gaar ahaan, arrimaha la xiriira amniga iyo xasilinta dalka. Wacyigelintaas waxay si gaar ah u abbaari doontaa da'yarta Soomaaliyeed, si ay uga feejignaadaan afkaarta lidka ku ah xasiloonida iyo falalka abuuri kara amni-darrada.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Dib u-eegista Siyaasadda Amni ee qeexaysa istraatiijiyadaha iyo qorshayaasha lagu hagayo amniga qaranka.
2. Dib u habaynta Hay'adaha amniga si ku salaysan heshiis Bulsho iyo sharci.
3. Dardar-gelinta hawlihii socday ee dib-u-habaynta Ciidamada Qaranka iyo hay'adaha korjoogtaynta amniga iyo difaaca.
4. Dejinta iyo Dib u eegista Shuruucda Hay'adaha amniga qaranka iyo shuruucda la xiriira.
5. Diyaarinta iyo gudbinta warbixinnada amni ee Golaha

Amaanka Qaramada Midoobay iyo qaraarrada la xiriira.

6. Qorshayaasha Xukuumadda ee Dib-u-xorraynta iyo Xasilinta Dalka.
7. Qorshayaasha Xukuumadda ee la dagaallanka iyo ka hortagga argagixisanimada iyo xagjirnimada (pcve).
8. Qorshayaasha Xukuumadda ee hirgalinta qaraarrada Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay.

## TIIRKA 2aad: CADAALAD IYO GARSOOR MADAX BANAAN

Xukuumadda Ra'iisul Wasaare Mudane, Xamse Cabdi Barre waxa ay mudnaan siin doontaa howlaha hortabinta u leh Hay'adaha Garsoorka iyo Cadaaladda. Cadaaladda waxaa udub dhexaad u ah helitaanka garsoor madax-bannaan oo ka hirgala dalka oo dhan.

Xukuumaddu waxay ahmiyad gaar ah siin doontaa dardar-gelinta howlaha Golaha Adeegga Garsoorka. Hiigsiga Xukuumaddu waa dhab-u-yagleelidda garsoor madax bannaan oo xaqiijiya u garnaqidda dadwaynaha dhexdooda, muwaadaniinta iyo dowladda, iyo hay'addaha dowladda dhexdooda. Wax-ka-qabadka cadaalad-darrada waxaa ugu horreynaya kudhaqanka saraynta sharciga iyadoo shuruucda dalku ay isku si u xakamaynayaan muwaadinka iyo hay'adaha dowladda.

Hadafka uu garsoorku higsanayo waa soo celinta kalsoonida muwaadinku ku qabo nidaamka cadaaladda dalka, iyo in uu helo nabad iyo ammaan, kuna noolaado cabsi la'aan uu sharcigu dammaanad qaadayo. Haddaba si yoolkaas loo xaqiijiyo, Xukuumaddu waxay hirgelinaysaa nidaam cadaaladeed oo awood u siinaya dadka oodhan iyadoo aan la fiirinayn jinsigooda, maqaamkooda bulsho, awooddooda dhaqaale iyo wax kasta oo sababi kara takoor. Waxa ay Xukuumaddu xoogga saari doontaa dib-u-habaynta iyo awood-dhiska hay'adaha garsoorka ee dalka iyo korjoogtayntooda.

Waxaa Xukuumadda ka go'an hirgelinta xeerarka wadaniga ah iyo kuwa dowliga ah ee xuquuqda aadanaha iyo dhawristooda, gaar ahaanna meelmarinta heshiisyada caalamiga ah ee Soomaaliya qaybta ka tahay.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Dib u eegista shuruucda iyo Siyaasadaha muhiimka u ah helitaanka Garsoor hufan oo madax-bannaan.
2. Dhamaystirka Heshiiska Siyaasadeed ee Hannaanka Garsoorka iyo Hay'adaha Cadaaladda;
3. Tayaynta iyo Korjoogtaynta hay'adaha Cadaaladda iyo Garsoorka.

4. Tayaynta iyo dib u habaynta Ciidamada Asluubta.
5. Daadajinta Adeegyada Garsoorka iyo dhiiri galinta xallinta khilaafaadka ku salaysan Xeer Soomaaliga.

## 2.1 MAAMUL-WANAAGGA IYO ISLAXISAABTANKA

Cadaaladda waxaa saldhig u ah in la abuuro aqoon ku salaysan sharci iyo nidaam, taasoo iyana aan ka maarmin aqoon iyo tayo ay ku dheehantahay wax garad, iyo tix-galinta danaha guud ee bulsho.

Gaabiska howlaha hay'adaha dowladda waxaa sal u ah isla xisaabtan la'aanta ka jirta hay'adaha dowladda taas oo keentay in ay habacsanaan ku timaado waxqabadka hay'adaha dowladda. Isla xisaabtan la'aan micnaheedu waa "dhiirigalinta Musuqa". Sidaa daraadeed, "Maamul Wanaagga iyo Isla-xisaabtanka" waa arrimaha muhiimadda iyo hortabinta u leh Xukuumadayda, taasoo keeni doonta hay'ado awood iyo karti u leh fulinta waajibaadka Qaranka.

Hadaba si loo helo hay'ado iyo shaqaale fulin kara waajibaadka Qaran waa in:

- La qeexo lana sugo waajibaadyada iyo qaabdhismeedyada dhammaan hay'adaha dowladda iyadoo loo marayo habraacyo deggan oo ay ansixiyaan golaha wasiirada ee xukuumadda.
- Dib u habeyn lagu sameeyo hannaanka maamulka shaqaalaha rayidka dowladda iyadoo la dar dargelinayo dhameystirka iyo ansixinta dhammaan shuruucda iyo xeerarka hagaya maareynta xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha rayidka dowladda.
- La dejiyo siyaasad jiheysa tababarrada shaqaalaha rayidka dowladda dibna loosoo nooleeyo machadkii tababarrada shaqaalaha rayidka dowladda ee arrimaha harumarinta maamul-wanaagga hay'adaha dowladda si sare loogu qaado aqoonta, xirfadaha iyo kartida shaqaalaha rayidka dowladda loona helo kaadiriin u carbisan shaqooyinka iyo maamulka guud ee hay'adaha dowladda heerarkooda kala duwan.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Xoojinta sugnaanta maamulka hay'addaha dowladda.
2. Dib u habaynta Shaqaalaha Rayidka Dowladda (Xuquuq iyo Waajibaad).
3. Xoojinta, tayaynta aqoonta, kartida iyo xirfadaha shqaalaha rayidka.

4. Dhiirrigalinta Daahfurnaanta, iyo Isla-xisaabtanka Hay'adaha dowladda.

## TIIRKA 3aad: SOOMAALI HESHIIS AH

### 3.1 DHAB U HESHIIN

Xukuumaddu waxay hiigsanaysaa wax ka qabashada colaadaha, is aaminaad la'aanta, iyo kala qaybsanaanta ku baahday dalkeenna, oo lagu baddalo midnimo Soomaaliyeed, laguna gaaro heshiisyo raalli la isaga yahay iyadoo laga faa'iidaysanayo casharradii laga soo bartay waqtiyadii adkaa ee dalkeenna iyo dadkeenna soo maray.

In kastoo shacabka Soomaaliyeed ay ka daaleen colaadihii sokeeye oo horumar la taaban karo laga gaaray isku-soo-dhaweynta shacabkeenna wada dhashay, haddana waxaa loo baahanyahay in la dhammeystiro geeddi-socodka nabadeynta dalka. Arrintaasi waxay shardi u tahay in laga dhabeeyo deganaansho-siyaasadeed iyo horumar amni, iyadoo la soo af-jarayo dhammaan colaadaha taagan, si loo xoojiyo kalsoonida iyo is-aaminka bulshada.

Sidaa darteed, waxaa xukuumadayda ka go'an hirgelinta hannaan siyaasadeed oo ku salaysan dib-u-heshiin, is-faham iyo midnimo, si loo helo xasilooni siyaasadeed iyo ummad nabad ku wada nool. Dareenka bulshadeenna waxaa ka muuqata bisayl, waxaana loo baahanyahay in dowladnimadu ay keento siyaasad mug leh oo wax ka qabata dhibaatooyinka dalka ka jira ee na dhaxalsiiyey xasillooni darrada, dagaallada, iyo colaadaha daba dheeraaday.

*“waxaa xukuumadayda ka go'an hirgelinta hannaan siyaasadeed oo ku salaysan dib-u-heshiin, is-faham iyo midnimo, si loo helo xasilooni siyaasadeed iyo ummad nabad ku wada nool.”*

**Halbeegyada Hortabinta leh:**

1. Hirgalinta Istiraatiijiyadda Qaran ee Dhab u heshiinta.
2. Dhamaystirka dib u eegista Dastuurka.
3. Dar-dar galinta arrimaha Federaalaynta iyo daadajinta dowladnimada.
4. Sii amba-qaadidda wadahadallada Soomaaliland.
5. Dimoqraadiyaynta iyo Dardargalinta Dowlad wanaagga
6. Diiwaangelinta Dadweynaha, iyo Howlaha Hay'adda aqoonsiga dadwaynaha
7. Midaynta Hannaanka Doorashooyinka Dalka
8. Hirgalinta Nidaamka Xisbiyada
9. Hirgalinta Doorashada Qof iyo Cod

## 3.2 DHAMMAYSTIRKA DIB U EEGISTA DASTUURKA

Hadafka xukuumaddu waa in la qabyo-tiro dastuurka dalka, si loo dardargeliyo dadaalladii muddada dheer soo socday ee dhammaystirka dastuurka, waxaana ay xukuumaddaydu abuuri doontaa jawi ay isugu yimaadaan madaxda siyaasadda ee labada heer (Federaal iyo Maamul Goboleed), wasaaradaha iyo hay'adaha. Sidoo kale, waxaa wadatashiyo lala samayn doonaa qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed.

> *"Hiigsiga Xukuumaddu waa in aan hirgalinno dowladnimo u dhaw shacabka, oo la wada leeyahay."*

Waxaan ognahay in inta badan arrimaha ka dhimman dastuurka ay yihiin arrimo ay ka jiraan aragti kala duwanaanshiyo oo ay muhiim tahay in laga wadahadlo, oo laga gaaro heshiis siyaasadeed oo la'isku raacsanyahay. Sidaas darteed, Xukuumaddu waxa ay agaasimi doontaa wadatashiyo loo dhanyahay, mug leh kuna soo dhammaada dastuur dhigaalkiisa iyo eray bixintiisaba la tafa-tiray, lagana heshiiyay.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Qabashada iyo Joogtaynta shirarka Golaha Wadatashiga Qaranka.
2. Dib-u-habaynta iyo dhamaystirka Guddiga Madaxa bannaan ee dib u eegista iyo hirgelinta dastuurka.
3. Diyaarinta qorshe midaysan ee dhamaystirka dib-u-eegista dastuurka.
4. Qabashada Shirwaynaha Bandhigista iyo Ansixinta Qorshaha Midaysan ee Dhamaystirka Dib-u-eegista Dastuurka.
5. Isla meeldhigidda iyo ansixinta dib-u-eegista farsamo ee dastuurka.
6. Billaabidda ka doodista farsamo iyo xal ka gaarista arrimaha u baahan wadaxaajood iyo heshiis siyaasadeed.
7. Waqti u qabashada qorshe hawleedyada dhammaystirka dib u eegista dastuurka iyo ka heshiinta nidaamka afti u qaadista dastuurka.
8. Wacyigalinta Dastuurka heer Federaal, heer Dowlad-goboleed, Heer Deegaan iyo Tuulo.

## 3.3 DAR-DAR GALINTA ARRIMAHA FEDERAALAYNTA IYO DAADAJINTA DOWLADNIMADA

Hiigsiga Xukuumaddu waa in aan hirgalinno dowladnimo u dhaw shacabka, oo la wada leeyahay. In kastoo dalkeennu qaatay nidaamka Federaaliga ah, haddana waxaan wali dhamaystirnayn siyaasadihii iyo xeerarkii lagu dhaqan galin lahaa federaalaynta dalka, taasi waxay keentay kala aragti duwanaansho labada heer ee dowladeed iyo dowlad goboleedyada dhexdooda waxayna horseedday in adeeggii bulshadu mudnayd aanay xukuumaddu fulin karin. Waxaa dhab ah in nidaamka federaaliga ahi uu yahay mid ku cusub bulshada Soomaaliyeed iyo hoggaanka dalkaba, shuruucda iyo qaab-maamulka dalkuna wali uu ku salaysan yahay nidaamkii dowladdii dhexe.

Waxaa xusid mudan in loo baahan yahay in heshiis laga gaaro maaraynta iyo maamulka amniga, garsoorka, dakhliga, maaraynta khayraadka, iyo ka go'aan qaadashada arrimaha mashaariicda kala duwan ee taabanaya danta bulshada ee heer qaran, gobol, degmo iyo tuulo.

Waxa ay xukuumaddaydu ka shaqayn doontaa fududaynta kulamada Golaha Wadatashiga Qaran, waxay golaha ka caawin doontaa qabsoomidda wada xaajoodyada loo madlanyahay, cillad bixinta iyo qeexitaanka waxyaabaha u baahda fasiraad dheeri ah, xiriirinta howlaha wasaaradaha ee labada heer ee dowladda iyo wax alla wixii farsamo iyo is waafajin u baahda.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Qabashada iyo Joogtaynta shirarka Golaha Wadatashiga Qaranka (GWQ).
2. Dib-u-eegista Guddiyada Madaxa Bannaan ee la xiriira arrimaha federaalaynta iyo Xuduudaha iyo guddiga dastuurka.
3. Kobcinta Awoodda Dhaqaale iyo Maamul ee Dowladaha Xubnaha ka ah DFS.
4. Dardargalinta dhismaha golayaasha deegaanka iyo dowladaha-hoose.
5. Daadajinta Adeegyada Dowladda iyo u dhawaynta bulshada.
6. Xoojinta xiriirka wadashaqaynta Hay'adaha Dowladda Federaalka iyo Hay'adaha Dowladaha Xubnaha ka ah DFS iyo Gobolka Banaadir.
7. Diyaarinta iyo ansixinta Hindise sharciyeedka Guddiga isku-xirka Xukuumadaha.

> *"Waxay xukuumadaydu ka shaqayn doontaa sidii loo diyaarin lahaa jawi ay ku qabsoonto doorasho qof iyo cod, xor iyo xalaal ah, kana dhacda goobo kala duwan"*

## 3.4 WADAHADALLADA SOOMAALILAND

Hadafka xukuumaddu waa in la helo Soomaaliya mid ah oo lagu gaaro heshiis. Midnimada dalka Soomaaliyeed waa lama huraan waana in la ilaaliyo wadajirka iyo walaalnimada dadka Soomaaliyeed. Xukuumaddu waxay halkeeda ka sii ambaqaadi doontaa wadahadalladii muddada dheer lagu soo hawlanaa ee u dhexeeyay Dowladda Federaalaka ah iyo maamulka Soomaaliland.

Xukuumaddaydu waxay kala shaqayn doontaa maamulka Soomaaliland sii wadidda iyo hirgalinta is af-garadyadii iyo heshiisyadii horay loo gaaray. Xukuumaddu waxay ku dadaali doontaa sidii wadahadalladdaasi u noqon lahaayeen kuwo miradhal keena Soomaaliya mid ah, heshiis ah, kana wada shaqeeya dib u dhiska dalka.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Dejinta qorshe qaran oo lagu wajahayo wadahadallada walaalaha Soomaaliland.
2. Dardargalinta wadahadallada Soomaaliland.
3. Dhamaystirka iyo hirgalinta is af-garadyadii iyo heshiisyadii horay loo gaaray.

## 3.5 DIMOQRAADIYAYNTA DALKA.

Hiigsiga xukuumaddu waa in aan qabanno doorasho heer Federaal, heer dowlad goboleed iyo mid deegaameed oo baahsan, oo si xalaal ah loogu tartamo, kuna qabsoonta waqtigeeda.

Waxaan ognahay in doorasho qof iyo cod ah oo dalka ka dhacda ay ugu danbaysay sannadkii 1969-kii. Intii ka dambeysay waqtigaas, dalku wuxuu ku soo jiray marxalado kala duwan oo ay ka mid yihiin xukun-ciidan, dagaallo sokeeye, dowlad la'aan, dowlad ku-meel-gaar ah iyo doorasho dadban. Waxay cashar lama illaawaan ah Soomaaliya ka heshay doorashadii 2020-2022 oo qaadatay muddo ku dhaw laba sano. Waxay xukuumadaydu ka shaqayn doontaa sidii loo diyaarin

lahaa jawi ay ku qabsoonto doorasho qof iyo cod, xor iyo xalaal ah, kana dhacda goobo kala duwan si doorashooyinka loo gaadhsiiyo inta ugu badan ee laga gaadhsiin karo dadka Soomaaliyeed. Xukuumaddu waxay mudnaanta siinaysaa diyaarinta nooca iyo hannaanka doorasho ee dalku qaadan doono.

Xukuumaddaydu waxay ku dadaali doontaa in ay xal u hesho caqabadaha badan ee ku gadaaman hirgalinta doorasho qof iyo cod ah oo ay ka mid yihiin diiwaangelinta dadweynaha, tirakoobka, midaynta hannaanka doorashooyinka dalka, hirgalinta nidaamka xisbiyada iyo qabashada doorasho qof iyo cod. Sidaas darteed xukuumaddaydu waxay xoogga saari doontaa wadatashiyo abuura jawi lagu midaysanyahay oo ay doorasho xalaal ah ku qabsoomi karto.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Gaarista doorasho qof iyo cod, xor iyo xalaal ah oo keenta xasillooni siyaasadeed ee heerarka kala duwan ee dowladda.
2. Dardar-gelinta howlaha Hay'adda Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed (DADSOM).
3. Hirgalinta Nidaamka Xisbiyada badan.
4. Dimoqraadiyaynta - Dardargalinta Dowlad wanaagga.
5. Midaynta Hannaanka Doorashooyinka Dalka.
6. Dejinta iyo hirgalinta qorshaha tirakoobka bulshada.

## TIIRKA 4aad: ISKU FILNAANSHO DHAQAALE

Hiigsiga xukuumaddu waa yaraynta saboolnimada, iyo gaaritaanka isku filnaansho dhaqaale. Waxaa xaqiiqa ah in saboolnimo baaxad leh ay ragaadisay dalka mudda dheer, iyada oo ay caddeyn u tahay in dadka Soomaaliyeed qiyaastii in ka badan 69% ay ku nool yihiin wax ka yar $2 doolar maalintii, 43% ay quutaan in ka yar $1 doolar maalintii. Waxaa intaa dheer, Soomaaliya dadkeedu waa dad dhallinyaro u badan, iyadoo qiyaaskii in ka badan 70% da'doodu ka yartahay 35 jir. Haddaba, saboolnimadu waxay sababtay amni-darro, gaajo, macaluul iyo in ay dhallinyaradu iskaga hayaamaan dalka ayagoo raadinaaya nolol iyo mustaqbal.

Saboolnimada ka jirta Soomaaliya ma aha mid dabiici ah ee waxaa sabab u ah colaadaha, iyo xasilooni-darrada ragaaday oo rejo-beel iyo darxumo ku noqotay ummadda Soomaaliyeed, gaar ahaan dhallinyarada iyo danyarta. Dhaqaalaha dalku ma horumarayo haddii aynaan si wadajir ah ula dagaallamin musuq-maasuqa, caddaalad-darada iyo amni-xumada.

Xukuumaddu waxay awood saari doontaa sidii dib loogu soo celin lahaa kaabayaashii dhaqaale sida furitaanka jidadka, dhismayaasha buundooyinka, garoomada iyo casriyaynta dakadaha gaar ahaan kuwa ilaha wax-soo-saarka sida marsooyinka kalluumaysiga, waraabka beeraha iyo biyaha xoolaha, xoogga korontada iyo tamarta la cusboonaysiin karo kuwaas oo laf-dhabar u ah kobaca ganacsiga, maalgashiga warshadaha iyo isticmaalka tiknooloojiyadda casriga ah.

Innagoo la soconna xaaladaha cakiran ee aduunka ka jira, kana faa'iidaysanayna khayraadka uu dalkeennu hodanka ku yahay iyo goobta juqraafiyadeed ee dalkeennu kaga yaallo caalamka ayaa waxa ay Xukuumaddu ahmiyad gaar ah siin doontaa soo saarista khayraadka badda oo uu ugu horreeyo kalluunka iyo shidaalka. Waxa aan sidoo kale mudnaan gaar ah siin doonnaa horumarinta xoolaha, iyo wax soo saarka beeraha. Xukuumadda waxaa ka go'an in waxqabad la taaban karo laga gaaro kobaca dhaqaalaha iyo wax-soo-saarka, suuq-geynta, shaqo-abuurka iyo baahinta maal-gashiga iyo dhaqdhaqaaqa ganacsiga iyadoo la dhiirigalin doono hal-abuurka, hindiseyaasha ganacsi, maalgashi, xirfadaynta, iyo shaqo-abuurka dhallinyarada.

Tek-noolajiyada, gaar ahaan isgaarsiinta iyo internet-ka ayaa gaarsiisan qeybo badan oo dalka ka mid ah, waxaase loo baahanyahay in la xoojiyo tayadooda, qiimuhuna noqdo mid suurto-gal ah, laguna baahiyo dalka oo idil. Taasi, waxay u baahaneysaa huffitaanka iyo dib u eegidda shuruucdii iyo nidaamkii lagu hagi lahaa, iyo hir galinta howlaha qabyada ah.

Sannadihii la soo dhaafay waxaa kor u kacay dakhliga dowladda, waxaa dib u habayn lagu sameeyay nidaamka maamulka maaliyadda ee dalka waxaa si wayn looga shaqeeyay barnaamijkii dayn caffiska oo dalka ku soo kordhiyay hirgalinta tallaabooyin wax-ku-ool u ahaa barnaamijyo horumarineed oo ay ka wada shaqeeyeen dowladda iyo Baanka Aduunka, kuwaasoo kobaciyay miisaaniyadda dowladda. Waxaa Xukuumdda ka go'an in aan si wayn u sii xoojinno kobaca dakhliga dowladda, tayaynno nidaamka isla xisaabtanka maaliyadeed, isla markaana dalka ku baahinno nidaam maaliyadeed oo casri ah.

> *"Hiigsiga Xukuumaddu waa in la cirib tiro musuqa lana abuuro dhaqan dowladeed ku qotoma maamul wanaag."*

Xukuumaddaydu waxa ay si wadajir ah uga shaqayn doontaa xoraynta, nabadaynta, sugidda aminga gobollada dalka iyo dib-u-dhiska kaabayaasha

dhaqaalaha, ayadoo wasaaradaha ay khusayso ay iska kaashan doonaan isku xirka iyo fulinta mashariicda waddooyinka, tamarta, eeriboorrada iyo howlaha sugidda amniga, taas oo macneheedu yahay in iyadoo goobaha aaminka ah ay si caadi ah uga socdaan horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha in haddana goobaha ay ka jirto amnidarrada aan ka hir galin doonno mashaariic la socota hawl-gallada amni sugidda.

Hiigsiga Xukuumaddu waa in la cirib tiro musuqa lana abuuro dhaqan dowladeed ku qotoma maamul wanaag. Dalkeennu ma horumari karo, dhaqalaheennuna ma kobci karo, isku filnaanshana ma hanan karo haddii aynaan abuurin dhaqan dowladnimo oo ka amba qaadaya maamul suubban iyo musuq-maasuq la'aan. Si loo soo celiyo wax wada-lahaanshihii ka dhexeeyay dadwaynaha iyo dowladda, loona xaqiijiyo in dib u dhiska dalka si wada jir ah looga qayb qaadanayo waa in la abuuraa jawi xaqiijinaya isla xisaabtan oo ay dowladdu gudanayso waajibkeeda adeeg ee ay shacabku xaqqa u leeyihiin. Xukuumaddu waxay xoogga saari doontaa guud ahaan la-dagaallanka musuq-maasuqa, gaar ahaan musuqa dhakhliga, kharash-bixinta, adeegga dadweynaha, iyo qandaraasyada dowladda. Xukuumaddu waxay qaadeysaa tallaabooyin cadcad oo horseedaya in dhakhliga canshuuraha oo ah hanti dadweyne soo wada gasho gacanta dowladda si loogu fuliyo adeegga loogu baahi badanyahay ee shacabka.

Si loo cirib tiro musuqa waa in hay'adaha dowladda iyo shaqaalaha xukuumaddu astaan u noqdaan hirgalinta iyo ku dhaqanka maamulka suuban oo ay ugu horrayso run sheegid, daacadnimo, waqti-ilaalin, iyo daah-furnaan, waxa ay dowladu ka shaqayn doontaa wacyi galin ku salaysan sharciyada dalka u yaalla iyadoo lala kaashanayo hay'adaha madaxa bannaan, culimada diinta, oday-dhaqameedyada, ganacsatada, ururrada bulshada iyo aqoonyahannada.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Horumarin dhaqaale, Nidaaminta iyo Kordhinta Dhakhliga Dalka:

   - *Kordhinta dakhliga ee ilaha dhaqaalaha qaranka iyo gaarista isku filnaansho miisaaniyadeed.*
   - *Fulinta barnaamijka dayn cafiska (ECF).*
   - *Midaynta nidaamka Dakhliga furdadaha iyo gaarista heshiiska federaalaynta maaliayadda.*
   - *Dhaqangalinta sharciga maaraynta maaliyadda dalka (PFM).*

- *Hirgalinta daabacaadda Lacagta Shilin Soomaaliga.*
- *Iskuxirka iyo maaraynta qulqulka lacagaha iyo baananka.*
- *Dib u eegista Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 9^aad iyo diyaarinta Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 10^aad.*

2. Kobcinta Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Wax-soo-saarka Dalka
   - *Horumarinta Wax Soo Saarka khayraadka dalka (Shidaalka, Macdanta, Beeraha, Kalluunka, Xoolaha, iwm)*
   - *Dhiirrigalinta maalgashiga dalka*
   - *Hirgalinta heshiisyada wax-soo saar wadaaga shidaalka (oil & Gas) ee dalka iyo is waafajinta shuruucda la xiriira maamulka maaliyadd*
   - *Horumarinta khayraadka badda*
   - *Dhiirrigelinta Ganacsiga Gaarka ah & dhamaystirka heshiisyada wadamada, urur goboleedyada iyo kuwa caalamka (TEPA, AfCFTA, COMMESA, WTO, etc.)*
   - *Horumarinta Tayo-dhawrka iyo gaarista hagayaasha caalamka (ISO)*
   - *Horumrinta kaabayaasha Dhaqaalaha (Dekadaha, Eerboorrada, jidadka, marsooyinka, etc.)*
   - *Horumarinta Warshaddaha iyo tamarta*
   - *Kafaa'iidaysiga teknoolajiyadda casriga ah*

> "Waxa aan ka shaqayn doonnaa fududaynta helitaan adeeg asaasi ah oo si siman loo gaarsiiyo shacabka, gaar ahaan danyarta, hooyada, dhallaanka iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba."

## TIIRKA 5^aad: HORUMARINTA ARRIMAHA BULSHADA

### 5.1 ARRIMAHA BULSHADA

Xukuumaddu waxa ay higsanaysaa in dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed ay helaan fursado siman oo Waxbarashada, Caafimaadka, Biyaha, iyo horumar ka dhaqaalaha.

Ayadoo mudnaanta koobaad ay xukuumaddu siinnayso arrimaha sugidda aminga iyo yagleelidda garsoor madax bannaan, haddana waxa aan ka shaqayn doonnaa fududaynta helitaan adeeg asaasi ah oo si siman loo gaarsiiyo shacabka, gaar ahaan danyarta, hooyada, dhallaanka iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba.

Sidaas daraadeed, xukuumaddu waxa ay xoogga saari doontaa in dhammaan degmooyinka laga xoreeyay argagixisada la gaarsiiyo adeegyo bulsho oo deg deg ah sida, dhismaha golayaasha deegaanka, hay'adaha amniga iyo garsoorka taas oo horseedi doonta dib-udhiska maamullada degaannada iyo soo-celinta kalsoonida ay shacabku ku qabaan dowladnimada.

Xukuumaddu waxa ay xal waara u keeni doontaa dhibaatooyinka qaxootiga iyo barakacayaasha Soomaaliyeed ee dalka iyo dibadiisa ku baahsan, iyadoo looga faa'iidayn doono qorshayaasha ay dowladdu u dajinayso dib-u-xasilinta iyo dib-u-dhiska dagmooyinka iyo gobollada dalka.

## 5.2 ARRIMAHA DEEGAANKA

Hiigsiga Xukuumaddu waa in la xakameeyo abaaraha iyo musiibooyinka dabiiciga ah ee dalkeenna ku soo laa-laabta. Deegaanku wuxuu asaas u yahay nolosha bulshada iyo horumarka dalka. Deegaankeenna wuxuu wajahaya caqabado farabadan sida nabaaad guurka, burburka dhulka, xaalufka, isbadelka cimilada, iyo dabar go'a noolaha kala duwan. Xukuumadda waxaa ka go'an inay muhiimad gaar ah siiso arrimaha ilaalinta deegaanka sida jaridda dhirta, ilaalinta qashinka, sunta lagu shubo badda iyo la tacaalidda saamaynta isbadelka cimilada (fatahaadaha iyo abaaraha).

Waxaa dadka Soomaaliyeed dhibaato ku haya abaaro iyo masiibooyin dabiici ah oo si joogta ah ugu soo laalaabta deegaannada dalka intiisa badan. Sida aynu la wada soconno waxaa maanta dalkeennu wajahayaa abaar ba'an oo barakicisay kumanaan dad ah, xaalufisay dhulkii, dishayna xoolo badan, waxaana innagu soo food leh fatahaado laga yaabo in ay barakiciyaan dad badan oo kale. Kaalmada ugu badan ee Soomaaliya la siiyo ayaa lagu sheegaa in ay ku baxdo howlaha gargaarka hasa yeeshee waxaa aad u yar barnaamijyada abuuri kara xal waara oo looga baxo abaaraha soo noq-noqday. Xukuumaddaydu waxa ay ka shaqayn doontaa gacan siinta dadka ay abaaruhu saameeyeen, waxayna u diyaar garoobi doontaa ka hor tagga fatahaadaha iyo daadadka laga yaabo in ay dhacaan xilliyo roobaadka soo socda.

Xukuumaddu waxa ay hawlgalin doontaa Xarunta Degdegga ah ee Qaranka (National Emergency Operation Centre) oo loogu tala-galay in ay isku xirto dhammaan howlaha gurmadka u baahan ee ka abuurma masiibooyinka dabeeciga iyo kuwa bini-aadan-ba. Xaruntan waxay xoojin doontaa awoodda dowladdu ay kaga jaawabayso qataraha bulshada ka soo gaara musiibooyinka dabiiciga ah.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Midaynta Dadaaladda Maaraynta Masiibooyinka iyo Xaaladaha Bini'aadinnimo.
2. Curinta hindisayaal shaqo abuur Qaran.
3. Horumarinta waxbarashada, tacliinta sare iyo tiknoolajiyadda.
4. Horumarinta adeegga caafimaadka ee asaasiga ah.
5. Ilaalinta deegaanka iyo yaraynta saamaynta arrimaha isbedelka cimilada.
6. Horumarinta biyaha iyo tamarta.
7. Horumarinta kartida aadanaha iyo wacyi galinta bulshada.
8. Ilaalinta iyo daryeelka bulshada.
9. Ilaalinta xuquuqda aadanaha.

## TIIRKA 6aad: SOOMAALI HESHIIS LA AH DUNIDA

Siyaasadda arrimaha dibadda ee Soomaaliya waxaa saldhig u ah ilaalinta madax bannaanidda iyo siyaadada dowliga ah. Xiriirka ay Soomaaliya la leedahay dalalka caalamka waxa uu ku salaysnaanayaa ilaalinta danaha u adeegaya qaranimada, jiritaanka iyo midnimada ummadda soomaaliyeed. Xukuumaddu waxa ay xoojineysaa doorka aan ku leenahay Ururrada dowliga ah iyo kuwa goboleed oo ay ka mid yihiini Qaramada Midoobay, Jaamacadda Carabta, Midowga Afrika, IGAD, OIC, iwm. Sidoo kale waxaan diirad gaar ah saari donnaa xoojinta xiriirka ganacsi, maalgashi iyo horumar ee u dhaxeeya Soomaaliya iyo wadamada deriska, gobolka iyo caalamka. Waxaa kale oo la xoojin doonaa iskaashiga aynu la leennahay dowladaha aan saaxiibka nahay dhanka nabadgalyada, isu socodka iyo dhaqaalaha.

Xukumaddu waxay horumarineysaa xiriir iyo siyaasad dibedeed oo ku qotonta dhowrista cahdiyada caalamiga ah ee Soomaaliya qayb ka tahay, deris wanaagga, faragalin la aanta, iyo nabad ku wada noolaanshaha iyadoo la ilaalinaayo gobanimmada, madax bannaanida, iyo midnimadda danaha dalka, iyo dadka Soomaaliyeed. Xiriirkaasi wuxuu noqonayaa mid isu dheelli tiran oo ay ka wada faa'iidaysanayaan Soomaaliya iyo dunida kale.

Waxaa kale oo la xoojin doonaa xiriirka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee wadamada adduunka ku kala nool, iyada oo awooddooda dhaqaale iyo siyaasadeed looga faa'ideysanayno in ay sii xoojiyaan xiriirka ka dhaxeeya wadamadaas ay joogaan iyo Soomaaliya.

### Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Xoojinta siyaasad miisaaman oo ku qotonta danaha dalka.
2. Horumarinta xiriirka iyo iskaashiga caalamiga ah.
3. Xoojinta xiriirka jaaliyadaha Soomaaliyeed.

# Gunaanad

Barnaamijkan kor ku qeexan ee ay hirgalin doonto xukuumaddaydu waxa uu qabsoomayaa waqti ay Soomaaliya ka soo kabanayso hubanti'la'aan iyo jahawareer siyaasadeed oo dalkeenna ku habsaday labadii sano ee la soo dhaafay. Nasiib darro labadaas sano waxaa abuurmay firaaq siyaasadeed, waxaa dhacday kala-aamin bax baahsan, waxaana dalku galay xaalado colaadeed, amni darro, kuwaas oo sababay barakac, cabsi iyo isu socod yaraan. Haddaba xukuumaddaydu waxa ay si feejignaan ku dheehantahay u qaadaa dhigi doontaa kana howlgali doontaa hannaanka ugu habboon ee loo soo celin karo jawi abuuraya kalsooni, soona celinaya amni bulsho si loo hirgaliyo agendaha horumarineed ee aynu hiigsanayno.

Barnaamijka Xukuumaddu waxa uu ka kooban yahay tiirarka dib u xoraynta iyo sugidda amniga, caddaalad iyo garsoor madax banaan, soomaali heshiis ah, isku filaansho dhaqaale, horumarinta bulshada iyo Soomaali heshiis la ah dunida, waxa aan ka shaqayn doonnaa hirgalinta halbeegyada ku xussan barnaamijkan si aynu u xaqiijinno horumar dhammaystiran oo ka hirgala dhammaan dalka.

Waxaan ka codsanayaa qaybaha kala duwan ee ummadda Soomaaliyeed iyo daneeyayaasha Soomaaliya in ay gacan nagu siiyaan sidii aan ugu tallaabsan lahayn tallaabo walba oo aan ku xaqiijinayno halbeegyada loo qorsheeyay afarta sano ee u qaybsan lixda tiir ee barnaamijka Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed ee 2022-2026.

*Wa-Billahi Twofiiq*

# LIFAAQ 1: QORSHE HOWLEEDKA GOLAHA WASIIRRADA 2022-2026 XUKUUMADDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

*"Howl Qaran iyo Hiigsi Dowlad Wanaag"*

## TIIRKA 1aad: DIB-U-XORAYNTA IYO SUGIDDA AMNIGA

| No. | HALBEEG | HOWL |
|---|---|---|
| | **1. DIB-U-HABEYNTA IYO TAYAYNTA HAY'ADDAHA AMNIGA** | |
| **1.1** | **Dib u-eegista siyaasadda Amni ee qeexaysa istraatiijiyadaha iyo qorshayaasha lagu hagayo amniga qaranka** | ▪ In wada tashi lala sameeyo dowlad goboleedyada, wasaaradaha iyo laamaha amniga si looga heshiiyo hab-maamulka qaybaha kala duwan ee ciidanka qaranka.<br>▪ Dardargalinta Iskudhafka Ciidanka qaranka.<br>▪ Qorshaha Samaynta ciidan cusub (force generation).<br>▪ Dhisidda hannaanka amniga qaranka.<br>▪ Dib-u-eegista Siyaasadda Amniga Qaranka ee 2016.<br>▪ Dib-u-eegista Siyaasadda Xasilinta.<br>▪ Dib-u-eegista Siyaasadda Qaran ee Ka-hortagga iyo La-dagaallanka Rabshadaha Xaqjirnimada ku Salaysan.<br>▪ Hirgilinta Siyaasadaha la xiriira la dagaalanka maal galinta argagixisada, lacag dhaqidda, iyo lacagaha baadda ah ee argagixisadu shacabka ka qaadaan.<br>▪ Hirgelinta Istiraatiijiyadda Qaran ee Wacyigelinta iyo Xiriirka Bulshada ee Amniga iyo Nabadaynta. |
| **1.2** | **Dib u habaynta Hay'adaha amniga si ku salaysan heshiis bulsho iyo sharci** | ▪ Dib u habaynta hannaanka maamul ee Ciidanka Qaranka, iyo qeexitaanka awoodaha maamul ee maaliyadda (Wasaaraddaha iyo talisyada).<br>▪ Diyaarinta howlaha amni ee hortabinta leh.<br>▪ Dib-u-eegista Sharciga Hay'adaha amniga yo shuruucda la xiriira.<br>▪ Dardar-gelinta dhammaystirka shuruucda dhawrista siraha qaranka.<br>▪ Diyaarinta istiraatiijiyadda la dagaallanka anshax-xumadda. |

| | | |
|---|---|---|
| **1.3** | **Dardargalinta hawlihii socday ee dib-u-habaynta Ciidamada Qaranka iyo hay'adaha korjoogtaynta amniga iyo difaaca** | ▪ In la diyaariyo lana wareejiyo nidaamka kaydka xogta ciidanka CXD (database and files) ee hada yaalla XRW laguna wareejiyo Wasaaradda Gaashaandhiga.<br>▪ In la gaarsiiyo Xarigga Fiber Optic- goobta la gaynayo faylalka Ciidanka. |
| **1.4** | **Dejinta iyo Dib u eegista Shuruucda Hay'adaha amniga qaranka iyo shuruucda la xiriira.** | ▪ Dardargelinta, dib-u-eegista/gudbinta shuruucda muhiimka u ah sugidda amniga ee laga soo celiyey Baarlamaankii 10-aad dibna loogu celiyo Baarlamaanka 11aad si loo ansixiyo. sida:<br><br>a. Hindise Sharciyeedka Difaaca Qaranka;<br>b. Hindise Sharciyeedka Xaqsiinta Ciidamada Qalabka Sida;<br>c. Hindise Sharciyeedka Ciidanka Booliska ee Heer Federaal;<br>d. Hindise Sharciyeedka Hubka Wax Dila;<br>e. Wax-ka-badalka Sharciga La-dagaallanka Burcad-badeedda iyo Ka-hortagga Afduubka, 1975;<br>f. Hindise Sharciyeedka Socdaalka;<br>g. Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Socdaalka (Immigration Authority Bill),<br>h. Hindise Sharciyeedka La-dagaallanka Argagixisada. |
| **1.5** | **Diyaarinta iyo gudbinta warbixinnada amni ee Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay iyo qaraarrada la xiriira** | ▪ Dejinta iyo fulinta qorshaha lagu hirgalinayo howlaha ku qeexan Qaraarrada ka soo baxa Golaha Amaanka Qramada Midoobay ee ay aqbashay dowladda Soomaaliya.<br>▪ Dejinta iyo fulinta qorshaha lagu hirgalinayo howlaha ku qeexan Qaraarka tirsigiisu yahay 2628 ee Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay iyo Warbixintii wadajirka ee Soomaaliya:<br>▪ Qorshaha wadajirka ee hawlgallada (CONOPs), iyo Qorshaha Kala Guurka ee Maarso 2022 (STP)<br>▪ Diyaarinta hiigsiga iyo halbeegyo lagu qiimeynayo hirgalinta qorshaha kala-guurka ee amniga, qorshaha Amniga qaranka (NSA) iyo Barnaamijka Hawlgalka iyo xiriirinta Amniga |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Soo bandhigidda istiraatiijiyadda lagu abuurayo ciidamo cusub iyo isku-dhafka ciidamada hadda jira.<br>▪ Dardargelinta sharciga xaqsiinta ee ciidamada (pensions and gratuity) |
| | **2. HOWLGALLADA DIB-U-XOREYNTA** | |
| ***2.1*** | **Dardargalinta howlgallada dib u xoreynta dalka** | ▪ In la dejiyo qorshe lagu hirgalinayo howlaha dib u xoreynta ee ku qeexan Qorshaha Hawlgallada (CONOPs), Qorshaha kala Guurka (STP), Warbixinta Soo jeedinta Wadajireed (JPR) iyo qaraarka tirsigiisu yahay 2628.<br>▪ Diyaarinta saadka ciidamada qalabka sida.<br>▪ Tayaynta iyo qalabaynta ciidamada qalabka sida.<br>▪ Dejinta istraatiijiyad howlgallo dib u xoreyn midaysan oo ka hirgala dalka oo dhan.<br>▪ Fulinta howlagallada dib u furitaanka waddooyinka waaweyn ee dalka. |
| ***2.2*** | **Qorshaha samaynta isku-dhafka ciidamada dalka iyo qaabdhismeedka ciidamo cusub** | ▪ In la diyaariyo istiraatijiyad lagu abuurayo ciidamo cusub, sidoo kale la isku dhaffayo ciidamada hadda jira. |
| ***2.3*** | **Qorshaha hirgalinta hawlgallada** | ▪ Hiigsiga Xoraynta Jubbooyinka & Gedo;<br>▪ Hiigsiga Xoraynta Shabeellaha Dhexe iyo Hiiraan;<br>▪ Hiigsiga Xoraynta Shabeellaha Hoose, Baay iyo Bakool;<br>▪ Hiigsiga Xoreynta Galguduud iyo Mudug (Koonfurta);<br>▪ Hiigsiga dib u hanashada eeriyada Galgala; |
| | **3. ARRIMAHA XASILINTA** | |
| ***3.1*** | **Istraatijiyadda Xasilinta** | ▪ Dib u eegis in lagu saameeyo siyaasadda Xasilinta.<br>▪ Fulinta qorshaha xasilinta loo dhanyahay, Dhamaan Gobollada iyo Caasimadda, |

| | | |
|---|---|---|
| **3.2** | **Isuduwidda Arrimaha Xasilinta** | ▪ In dib loo soo nooleeyo guddi-hawleedka wasaaradaha iyo hay'adaha ka shaqeeya xasilinta |
| **3.3** | **Sugidda Howlaha Xasilinta ee Socda** | ▪ Samaynta adeegyada dowladda ee deegaamada la xoreeyay.<br>▪ Dhamaystirka adeegyada bulshada deegaannada la xoreeyay sida dhismaha kalsoonida bulshada iyo isdhexgalka, dhismaha Maamulka Degmada, Maxkamadaha, iyo xarumaha booliska iwm.<br>▪ Dib u furidda kanaallada deegaanada la xoreeyay<br>▪ Dhismaha iyo dayac tirka buundooyinka isku xira gobollada dalka. |
| | **4. HIRGELINTA QARAARRADA GOLAHA AMAANKA EE QM.** | |
| **4.1** | **Hirgalinta Qaraarrada Golaha Amaanka ee QM** | ▪ In la diyaariyo, lana dabagalo warbixin loo gudbiyo Golaha Amaanka QM oo faah-faahineya horumarka laga gaaray hirgalinta STP, NSA iyo horumarka diyaarinta ciidamaddii kala wareegi lahaa ATMIS 2024. |
| **4.2** | **Hirgalinta Qorshaha Wadajirka ee Hawlgallada (CONOPs), NSA, Qorshaha Kala Guurka ee Maarso 2022 (STP) iyo Warbixintii Wadajirka ee Soo Jeedinta ahayd (JPR)** | ▪ In la dejiyo qorshe lagu hirgalinayo howlaha ku qeexan CONOPs, STP, JPR iyo qaraarka tirsigiisu yahay 2628 ee GAQ.<br>▪ In la diyaariyo shuruudo (Benchmarks) cad-cad oo macquul ah kuna habboon qiimeynta iyo hirgalinta STP iyo CONOPs<br>▪ In la dhameystiro qorshaha taakuleynta Saadka ee Ciidamada (ATMIS iyo SSF).<br>▪ In la dardar geliyo sharciga xaqsiinta ee ciidamada (pensions and gratuity) loona raadiyo miisaaniyad.<br>▪ Habsami u socodsiinta kulamada FGS, FMS iyo IC |

| | 5. LA DAGAALLANKA IYO KA HORTAGGA ARGAGIXISANIMADA IYO XAGJIRNIMADA (PCVE) | |
|---|---|---|
| *5.1* | **Istiraatiijiyadda qaran ee la dagaalLanka argagixisada iyo Xagjirnimada** | ▪ Dardargelinta ansixinta Hindise-sharciyeedka La dagaalLanka Argagixisada ee horyaalla Golaha Shacabka.<br>▪ Diyaarinta sharciga la dagaallanka xagjirnimada. |
| *5.2* | **Isuduwidda howlaha qaran ee ladagaalanka iyo ka hortagga Xagjirnimada iyo argagixisada** | ▪ Hawl-galinta Xarunta Qaran ee La dagaallanka iyo Ka hortagga Xagjirnimada.<br>▪ Xakamaynta walxaha qarxa iyo waxyaabaha laga sameeyo.<br>▪ Kor u qaadista wacyiga bulshada iyo midaynta dadaallada qaran ee ka hortagga xagjirnimada.<br>▪ Nidaaminta iyo Dardargelinta Xarumaha Dhaqancelinta. |
| *5.3* | **Wacyigelinta bulshada** | ▪ Qabashada Shirweynaha Culumada Soomaaliyeed ee La dagaallanka iyo ka hortagga xagjirnimada.<br>▪ Taabagellinta Istiraatiijiyadda Warbaahinta ee ka hortagga Xagjirnimada. |
| *5.4* | **Xakamaynta ilaha dhaqaalaha ee argagixisada** | ▪ Dabagalka iyo baaritaanka howlaha lacag dhaqidda (ML).<br>▪ In dib u eegis lagu sameeyo sharciga dad dhigista, lana fuliyo nadaamka diiwaangalinta dadwaynaha.<br>▪ In la diiwaan galiyo xogta macaamiisha (KYC) ee isticmaalka lafta taleefoonka (SIM CARDS). |

## TIIRKA 2aad: CADAALAD IYO GARSOOR MADAX BANAAN

| | 1. CADAALAD IYO GARSOOR MADAX BANNAAN | |
|---|---|---|
| 1.1 | **Dib u eegista shuruucda iyo siyaasadaha muhiimka u ah helitaanka Garsoor hufan oo madax-bannaan.** | ▪ In Golaha wada tashiga Qaranku Heshiis Siyaasadeed ka gaaraan hannaanka Cadaaladda iyo Garsoorka Dalka.<br>▪ In dib u eegis lagu sameeyo hannaanka iyo shuruucda garsoorka iyo caddaallada si loo waafajiyo nidaamka federaalka ee lagu heshiiyay: |

| | | |
|---|---|---|
| | | a. *Hindise Sharciyeedka Xeer-ilaalinta;*<br>b. *Xeerarka Ciqaabta;*<br>c. *Xeerka Madaniga;*<br>d. *Sharciga Nidaamka Garsoorka;*<br>e. *Xeerka Kaalmo Sharciyeedka;*<br>f. *Hindise Sharciyeedka Xabsiyada;*<br>g. *Hindise sharciyeedka Garyaqaanka Guud ee dalka;* |
| **1.2** | **Dhamaystirka Heshiiska Siyaasadeed ee Hannaanka Garsoorka iyo Hay'adaha Cadaaladda;** | ▪ Dib u eegista dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka iyo Guddiga La dagaallanka Musuqmaasuqa.<br>▪ Hawl-gelinta Golaha Adeegga Garsoorka,<br>▪ Samaynta Maxkamadda Dastuurka.<br>▪ Samaynta iyo howl galinta Xafiiska Qabashada Cabashooyinka (Xafiiska Gardoonka). |
| **1.3** | **Tayaynta iyo Korjoogtaynta Hay'addaha Cadaaladda iyo Garsoorka** | ▪ Diyaarinta Istiraatiijiyadda Horumarineed ee 5 sano ee Hey'adaha Garsoorka (Justice Sector Strategic Plan).<br>▪ In la sameeyo qorshe howleedka Hay'adaha Garsoorka iyo cadaalladda oo laga hirgaliyo dalka oo dhan.<br>▪ Dardargelinta iyo hawlgelinta Machadka Tababarka Garsoorka. |
| **1.4** | **Tayaynta iyo dib u habaynta Ciidamada Asluubta** | ▪ Diyaarinta istiraatiijiyadda ciiddamada Asluubta.<br>▪ Dhamaystirka adeegga Xabsiyada iyo qawaaniintooda.<br>▪ Diiwaan galinta ciidanka asluubta.<br>▪ Kor u qaadista tayada ciidanka Asluubta. |
| **1.5** | **Daadajinta Adeegyada Garsoorka iyo dhiiri galinta xalinta khilaafaadka ku salaysan xeer Soomaaliga** | ▪ Abuurista maxkamadaha guur-guura.<br>▪ Dhiirigalinta guurtida iyo xalinta khilaafaadka ee aan ka hor imaanayn shuruucda dalka. |
| | **2. MAAMUL-WANAAGGA IYO ISLAXISAABTANKA** | |
| **2.1** | **Xoojinta sugnaanta maamulka Hay'addaha Dowladda** | ▪ Meelmarinta xeerka hagaya qaab-dhismeedka hay'addaha dawladda (Ordinance). |

| | | |
|---|---|---|
| **2.2** | **Dib u habaynta Shaqaalaha Rayidka Dawladda (Xuquuq iyo Waajibaad)** | ▪ Dib u eegista iyo meel marinta sharciga shaqaalaha rayidka.<br>▪ Dib u eegista iyo meel marinta hindise sharciyeedka hawl-gabka Shaqaalaha Rayidka.<br>▪ Dhamaystirka iyo meel marinta siyaasadda jaangoynta darajooyinka iyo mushaaraadka shaqaalaha rayidka ah.<br>▪ Fulinta iyo dardargalinta xeer nidaamiyayaasha iyo habraacyada hagaya shaqaalaha rayidka ah.<br>▪ Diyaarinta nidaam danabaysan ee xogta shaqaalaha rayidka (HRMIS). |
| **2.3** | **Xoojinta, tayaynta aqoonta kartida iyo xirfadaha Shqaalaha Rayidka** | ▪ Diyaarinta iyo ansixinta siyaasadda iyo hindise sharciyeedka tababarka Shaqalaha rayidka ee maamulka guud.<br>▪ Dib u dhiska machadka tababarada shaqaalaha. |
| **2.4** | **Dhiirigalinta daahfurnaanta, iyo isla-xisaabtanka Hey'adaha Dowladda** | ▪ Dib u eegista iyo dhamaystirka hay'adda la'dagaalanka musuqa.<br>▪ Dajinta istiraatijiyadda la dagaalanka musuqa.<br>▪ Dhamaystirka Sharciga Hantidhawrka Qaranka.<br>▪ Dabagalka iyo fulinta talobixinta Hanti Dhowrka Qaranka si waafaqsan Sharciga Hantidhawrka Qaranka.<br>▪ Hubinta isla xisaabtanka hay'addaha Dawliga ah, kuwa gaarka ah iyo kuwa aan dawliga ahaynba. |

## TIIRKA 3aad: SOOMAALI HESHIIS AH

| | | |
|---|---|---|
| | **1. DHAB U HESHIIN** | |
| **1.1** | **Hirgalinta Istiraatiijiyadda Qaran ee Dhab u Heshiinta.** | ▪ Daahfurka Istiraatiijiyadda Qaran ee Dhab u heshiinta (NRF).<br>▪ Diyaarinta qorshe howleedyo lagu fulinayo istraatiijiyadda qaran ee dhab u heshiinta.<br>▪ Abuurista Barnaamijyo wacyigalin/nabadayn iyo xallinta khilaafaadyada heer Federaal, deegaan iyo deris.<br>▪ Dhiirigelinta nabadda, wadanoolaanshaha iyo iscafinta ummadda Soomaaliyeed. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Kalsooni dhiska bulshada qaybaheeda kala duwan. |
| **1.2** | **Dhamaystirka dib u eegista Dastuurka** | ▪ Qabashada iyo joogtaynta shirarka Golaha Wadatashiga Qaranka.<br>▪ Dib u habaynta iyo dhammaystirka Guddiga Madaxa Bannaan ee dib u eegista iyo hirgelinta Dastuurka.<br>▪ Diyaarinta Qorshe Midaysan ee dhammaystirka dib u eegista Dastuurka.<br>▪ Qabashada Shirwaynaha bandhigista iyo ansixinta Qorshaha midaysan ee dhamaystirka dib u eegista Dastuurka.<br>▪ Isla meeldhigidda iyo ansixinta dib u eegista farsamo ee dastuurka.<br>▪ Waqti u qabashada qorshe hawleedyada dhammaystirka dib u eegista dastuurka iyo ka heshiinta nidaamka afti u qaadista dastuurka.<br>▪ Wacyigalinta Dastuurka heer Federaal, heer Dowlad-goboleed, Heer Deegaan iyo Tuulo.<br>▪ Bilaabidda ka doodista farsamo iyo xal ka gaarista arrimaha u baahan wadaxaajood iyo heshiis siyaasadeed sida:<br>a. Qaybinta Awoodaha Dowladda (Article 54);<br>b. Arrimaha Wadaagga Kheyraadka (Article 44);<br>c. Hannaanka Maaliyadda Federaaliga (Article 122);<br>d. Maqaamka Caasimadda Muqdisho (Article 9);<br>e. Dhamaystirka Hannaanka Garsoorka (Article 108 & 109);<br>f. Hannaanka Doorashooyinka iyo matalaadda shacabka (Article 46 & 47);<br>g. Nidaamka Federaalka iyo Soohdimaha;<br>h. Qaab dhismeedka iyo kala soocidda awoodaha hey'adaha dowladda;<br>i. Nidaaminta Qaab dhismeedka Amniga Qaranka (NSA); |
| ***1.3*** | **Dar-dar galinta arrimaha federaalaynta iyo daadajinta dowladnimada** | ▪ Joogtaynta Shirarka Golaha Wadatashiga Qaranka (GWQ). |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Dib u eegista Guddiyada Madaxa Bannaan ee la xiriira arrimaha federaalaynta, Xuduudaha iyo guddiga dastuurka.<br>▪ Kobcinta Awoodda Dhaqaale iyo Maamul ee Dowladaha Xubnaha ka ah DFS.<br>▪ Dardargalinta dhismaha golayaasha deegaanka iyo dowladaha-hoose.<br>▪ Daadajinta Adeegyada Dowladda iyo u dhawaynta bulshada.<br>▪ Xoojinta xiriirka wadashaqaynta Hay'adaha Dowladda Federaalka iyo Hay'adaha Dowladaha Xubnaha ka ah DFS iyo Gobolka Banaadir.<br>▪ Diyaarinta iyo ansixinta Hindise sharciyeedka Guddiga isku-xirka Xukuumadaha. |
| ***1.4*** | **Sii amba-qaadidda wadahadallada Soomaaliland.** | ▪ Dajinta qorshe qaran oo lagu wajaho wadahadallada walaalaha Somaliland.<br>▪ Dardargalinta wadahadallada Somaliland.<br>▪ Dhamaystirka iyo hirgalinta is af-garadyada iyo heshiis yadii horay loo gaaray. |
| **1.5** | **Dimoqraadiyaynta iyo dardargalinta dowlad wanaagga** | ▪ Xoojinta kala soocnaanta awoodaha hay'adaha qaranka.<br>▪ Xoojinta wadatashiyada iyo xiriirinta hay'adaha Qaran.<br>▪ Xaqiijinta ka qaybgalka muwaadinka ee dowladnimada.<br>▪ Kor u qaadista wacyiga bulshada ee xuquuqda muwaadinka. |
| **1.6** | **Diiwaangelinta Dadweynaha, iyo Howlaha Hay'adda Aqoonsiga Dadwaynaha** | ▪ Dardar-gelinta howlaha Hay'adda Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed (DADSOM).<br>▪ Dardargalinta Siyaasadda Dad-dhigista.<br>▪ Dib-u-eegista Hindise-sharciyeedka Muwaadinka.<br>▪ Dejinta iyo hirgalinta Qorshaha tirakoobka bulshada. |

| | 2. QABASHADA DOORASHO QOF IYO COD,XOR IYO XALAAL AH | |
|---|---|---|
| **2.1** | **Midaynta Hannaanka Doorashooyinka Dalka** | ▪ Dib u eegista dhismaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka.<br>▪ Samaynta Hannaan Midaysan oo lagu fulinayo doorashooyinka heerarka kala duwan ee dalka. |
| **2.2** | **Hirgalinta Nidaamka Xisbiyada** | ▪ Dhamaystirka iyo dardargalinta Hindise-sharciyeedka xisbiyada.<br>▪ Dhammaystirka diiwaangalinta xisbiyada qaran. |
| **2.3** | **Hirgalinta doorashada Qof iyo Cod** | ▪ Dejinta iyo hirgalinta qorshaha Doorashada ee qof iyo cod. |

## TIIRKA 4aad: ISKU FILNAANSHO DHAQAALE

| | 1. HORUMARINTA DHAQAALAHA, NIDAAMINTA IYO KORDHINTA DHAKHLIGA DALKA | |
|---|---|---|
| **1.1** | **Kordhinta Canshuuraha iyo ilaha dakhliga dhaqaalaha qaranka si loo gaaro isku filnaansho miisaaniyadeed** | ▪ Diyaarinta qorshe ama istraatijiyad isku filaansho miisaaniyadeed.<br>▪ Dib u eegista illaha dakhliga qaranka.<br>▪ Iskuxirka iyo maaraynta qulqulka lacagaha iyo baananka.<br>▪ Dib u eegista hannaanka dakhli uruurinta iyo isticmaalka tiknolojiyada.<br>▪ Wacyi galinta adeega iyo waajibaadka.<br>▪ Abuurista hay'adda dakhli uruurinta. |
| **1.2** | **Fulinta barnaamijka dayn cafiska (ECF)** | ▪ Dardar-gelinta barnaamijka dayn cafiska (ECF).<br>▪ Dabagalka balanqaad yada kabka miisaaniyadda. |
| **1.3** | **Midaynta nidaamka Dakhliga furdadaha iyo gaarista heshiiska federaalaynta maaliayadda** | ▪ Dajinta habraacyada dakhli Ururinta JFS.<br>▪ Dardargelinta Wadatashiyada heer Federaal iyo Heer Dowlad-Goboleedyada. |

| | | |
|---|---|---|
| 1.4 | **Dhaqangalinta sharciga maaraynta maaliayadda dalka (PFM)** | ▪ Taaba galinta Awoodda shaqo ee bangiga dhexe.<br>▪ Dajinta Qorshaynta Midaynta Miisaaniyadda Dalka (Federaal iyo Dowlad-goboleed).<br>▪ Midaynta Warbixinnada ee nidaamka maamulka maaliayadda (Bisan/FMIS). |
| 1.5 | **Hirgalinta daabacaadda lacagta Shilin Soomaaliga** | ▪ Dejinta siyaasadda iyo istiratijiyadda daabicidda lacagta shilin Soomaaliga.<br>▪ Fulinta iyo maaraynta lacagta cusub iyo jaangoynta isku bedelka lacagaha qalaad. |
| 1.6 | **Iskuxirka iyo maaraynta qulqulka lacagaha iyo baananka** | ▪ Dhamaystirka shatiyada lacagta danabaysan (mobile money).<br>▪ Dhamaystirka qorshaha isku xirka baananka iyo dhaqadhaqaaqa lacagaha.<br>▪ Dejinta qorshaha illaalinta lacagta la dhaqo, iyo maalgalinta xagjirka. |
| 1.7 | **Dib u eegista Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 9aad iyo diyaarinta Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 10aad.** | ▪ Dib u qiimayn Fulinta Qorshaha Horumarinta Qaranka 9aad (2020 – 2024).<br>▪ Diyaarinta Qorshaha Horumarinta Qaranka 10aad (2024-2029).<br>▪ Is-waafajinta barnaamijka xukuumdda iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka.<br>▪ In lagu saleeyo miisaaniyadda dalka howlaha hortabinta u leh Qorshaha Horumarinta Qaranka.<br>▪ In lagu saleeyo deeqaha horumrineed (IFIs/Multilateral, Bilaterals) ee dalka howlaha hortabinta u leh Qorshaha Horumarinta Qaranka.<br>▪ Kormeerka mashaariicda horumarineed, isla xisaabtanka iyo joogtaynta daahfurnaanta.<br>▪ Dhamaystirka Daraasadda Hiigsiga Qaran ee Horumarinta Dhaqaalaha (2050) ee ay wadaan Golaha Dhaqaalaha Qaranka (NEC).<br>▪ Diyaarinta mashaariic dhamaystiran (feasibility, costing and impact assessment). |

| | 2. KOBCINTA DHAQAALAHA, GANACSIGA IYO WAXSOOSAARKA DALKA | |
|---|---|---|
| **2.1** | **Horumarinta Wax Soo Saarka khayraadka dalka (Shidalka, Macdanta, Beeraha, Kaluunka, Xoolaha, iwm)** | ▪ Dib u eegis in lagu sameeyo fulinta heshiiyada iyo siyaasadaha wadaagga kheyraadka dalka.<br>▪ In la mideeyo heshiisyada kaluumaysiga.<br>▪ Dejinta qorshaha fulinta heshiisyada wadaaga.<br>▪ Diyaarinta mashaariic horumarineed ee khayraadka dalka iyo shaqo abuurka. |
| **2.2** | **Dhiirigalinta maalgashiga dalka** | ▪ Dhamaystirka sharciga hay'adda maalgashiga iyo sharciga ilaalinta maalgashiga iyo maalgashadaha.<br>▪ Dhiirigalinta Iskaashiga maalgashatada iyo hay'adaha dawliga ah (PPP). |
| **2.3** | **Hirgalinta heshiisyada wax-soo saar wadaaga shidaalka (oil & Gas) ee dalka iyo is waafajinta shuruucda la xiriira maamulka maaliyadda** | ▪ Dhamaystirka heshiiska wax-soo-saarka shidaalka iyo wadaaga (PSA).<br>▪ Dajinta Qorshaha ka faa'iidaysiga waxsoosaarka Shidaalka. |
| **2.4** | **Horumarinta khayraadka badda** | ▪ Dib u eegis in lagu sameeyo fulinta heshiiyada iyo siyaasadaha wadaagga kheyraadka dalka.<br>▪ In la mideeyo bixinta shatiyadda kaluumaysiga.<br>▪ In la xoojiyo awoodaha kormeerka iyo illaalinta khayraadka badda. |
| **2.5** | **Dhiirigelinta Ganacsiga Gaarka ah & dhamaystirka heshiisyada wadamada, urur goboleedyada iyo kuwa caalamka (TEPA, AfCFTA, COMMESA, WTO, etc.)** | ▪ Dib u eegista sharciyada, heshiisyada iyo siyaasadaha baarlamaanka 10aad soo celiyay.<br>▪ In la abuuro siyaasado horumarinaya ganacsiga gaarka ah ee Soomaaliya.<br>▪ In dib u eegis lagu sameeyo heshiisyada lagalay lana dardar galiyo dhamaystirka heshiisyada.<br>▪ Dhamystirka xubin nimada WTO iyo magacaabista Ergayga Wadahadalada. |

| | | |
|---|---|---|
| **2.6** | **Horumarinta Tayo-dhawrka iyo gaarista hagayaasha caalamka (ISO)** | ▪ Tayaynta hay'adda tayo-dhowrka iyo gaarsiinta istaandarka caalamka.<br>▪ In la dhamaystiro dhamaan hab-raacyada xarunta tayo-dhawrka.<br>▪ In la sameeyo xarumo qalabaysan oo lagu hubinayo tayada alaabta la soo saarayo, dhoofinayo ama la keenayo. |
| **2.7** | **Horumrinta kaabayaasha Dhaqaalaha (Dekadaha, Ayraboorada, jidadka, marsooyinka, etc.)** | ▪ In dib loo dhiso kaabayaasha dhaqaale ee sahlaya sugidda aminga sida buundooyinka, jidadka, garoomada (airstrips) iyo dekadaha.<br>▪ Dibu dhiska kaabayaasha dhaqaalaha ee hortabinta u leh gobollada xasiloon.<br>▪ Dhiirigalinta maalgashiga wadaaga ah ee kaabayaasha dhaqaalaha PPP/BOT (Build Operate and Transfer). |
| **2.8** | **Horumarinta Warshaddaha iyo Tamarta** | ▪ In la dardar galiyo fulinta shuruucda, iyo siyaasadaha warashadaha iyo tamarta.<br>▪ In dawladdu hagto siyaasadda lagu maamulo waxsoosaarka, kaydinta, gudbinta iyo qaybita tamarta.<br>▪ In la kordhiyo soo saarista tamarta la cusboonaysiiyo si tamar qiimo jaban loo helo.<br>▪ In la dhiirigaliyo warshadaynta iyo warshadaha si loo kobciyo wax-soosaarka dalka. |
| **2.9** | **Kafaa'iidaysiga teknoolajiyadda casriga ah** | ▪ Dhiirigalinta hal-abuurada ganacsi ee tiknoolajiyadda.<br>▪ Dardargalinta howlaha Isgaarsiinta Qaranka iyo Ka faa'iidaysiga tiknoolajiyadda. |

## TIIRKA 5aad: HORUMARINTA ARRIMAHA BULSHADA

| | | |
|---|---|---|
| | **1. MAARAYNTA MASIIBOOYINKA IYO XAALADAHA BINI'AADINNIMO** | |
| **1.1** | **Midaynta Dadaalladda Maaraynta Masiibooyinka iyo Xaaladaha Bini'aadinnimo** | ▪ In la mideeyo howlagallada gurmadka degdeg ah ee abaaraha.<br>▪ In la qoondeeyo Miisaaniyad u gaar ah howlaha gurmadka degdegga ah ee abaaraha. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Samaynta Qorshaha Qaran ee Ka hortagga masiibooyinka soo noqonoqda sida Abaaraha, Fatahaadaha, Daadadka iyo cudurrada faafa.<br>▪ Fulinta Istiraatiijiyadda Qaran ee Xalka Waara (Durable solution).<br>▪ Hawl-gelinta Xarunta Qaran ee Gurmadka Degdegga ah, si loo xiriiriyo dhammaan qaybaha kala duwan ee ka hortagga musiibooyinka (National Emergency Operation Response Center).<br>▪ Fulinta iyo dardargelinta Barnaamijyada Ka-soo-kabashada Saameynta Dhaqaale ee Caabuqa COVID-19, Ayaxa, Daadka & Abaaraha (Recovery projects). |
| | **2. HORUMARINTA ADEEGYADA BULSHADA** | |
| **2.1** | **Curinta hindisayaal shaqo abuur qaran** | ▪ Samaynta Hindise Shaqo Abuur Qaran si loo dhiirri galiyo fulinta himilada "Soomaali Isku Filan".<br>▪ Dhiirrigalinta hal-abuurrada ganacsi ee ku qotoma wax soosaarka dalka.<br>▪ In la sameeyo xarumo iyo taba-barro xirfadeed oo sahlaya shaqa abuurka.<br>▪ Dhiirri galinta maalgashiyada iyo ganacsiyada yar-yar ee abuuraysa shaqooyinka xirfadlayda.<br>▪ In kor loo qaado dhiirigalinta hal-abuurka ganaciga, shaqo abuurka iyo maalgashiga. |
| **2.2** | **Horumarinta Waxbarashada, Tacliinta sare iyo Tiknoolajiyadda** | ▪ Dibu eegista iyo dardargelinta Qorshaha Horumarinta Tacliinta Sare (Dabagalka tayada iyo shuruucda).<br>▪ Dajinta Siyaasadda Qaran ee Iskuulada Xirfadaha.<br>▪ Horumarinta waxbarashada xirfadaha lagu shaqeysto ee dadka waaweyn iyo kuwa aan helin fursadaha waxbarasho.<br>▪ Yagleelidda Xarumo Tababar Farsamo oo wadanka dhan iyo dejinta siyaasadaha iyo barnaamijyada la xiriira tababarada iyo xirfad-abuurka ayadoo ahmiyad gaar ah la siinayo gabdhaha. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ In la hir galiyo Ol-ole Qaran oo lagu dhiirri galinayo waxbarashada aasaasiga ah.<br>▪ Dhisida Guddiga Qaran ee imtixaanka iyo Shahaadooyinka oo heshiis lagu yahay.<br>▪ Dhismaha iyo Hawlgelinta Guddiga Qaran ee Manhajka.<br>▪ Yagleelida Qeybta xannaanada Carruurta iyo Barbaarinta.<br>▪ Kordhinta tirada iyo tayada waxbarashada hoose iyo sare.<br>▪ Dib-u-eegista iyo hawl galinta Golaha Tacliinta Sare.<br>▪ Xaqiijinta gaarsiinta agabka waxbarashada dhammaan gobollada dalka ee Manhajka Dugsiyada hoose iyo sare. |
| **2.3** | **Horumarinta adeegga caafimaadka ee asaasiga ah** | ▪ Xoojinta isku xirka iyo tayeynta goobaha lagu bixiyo adeegyada asaasiga ah ee daryeelka caafimaad.<br>▪ Fulinta qorshaha caafimaadka qaranka<br>▪ Diyaarinta iyo hirgalinta Bangiga Dhiigga Qaran.<br>▪ Dayactirka Isbitaalka Xoogga Dalka.<br>▪ Dabagalka iyo xakamaynta tayada dawooyinka soo gala dalka.<br>▪ Casriyaynta iyo ballaarinta shaybaarka qaranka.<br>▪ Dhismaha xarumo caafimaad ee degmooyinka laga xoreeyo Al-Shabaab.<br>▪ kor-u-qaadista dadaallada lagu kordhinayo dhismaha iyo dayactirka xarumaha caafimaad ee gobollada dalka gaar ahaan hooyada iyo dhallaanka.<br>▪ Hormarinta iyo gacan ku haynta isbitaallada dowladda iyo u qoondeynta miisaaniyad u gaar ah.<br>▪ Hubinta iyo la socodka tayada iyo hufnaanta adeeg bixinta caafimaad ee isbitaallada gaarka loo leeyahay.<br>▪ Hormarinta Yoolka Caafimaadka Haqabtiran ee loo dhanyahay iyo dhaqangelintiisa (UHC) |

| | | |
|---|---|---|
| **2.4** | **Horumarinta biyaha iyo tamarta** | ▪ Dejinta Qorshaha Guud ee Tamarta.<br>▪ Aasaasidda Hay'adda Tamarta ee Qaranka.<br>▪ Hirgelinta iyo meel marinta heshiisyadda Dowliga ah ee Tamarta.<br>▪ Aasaasidda Machadka Tamarta.<br>▪ Ansixinta iyo hirgelinta sharciga guud ee Kheyraadka Biyha.<br>▪ Dejinta Qorshe Guud ee Kheyraadka Biyaha.<br>▪ Diyarinta Daraasadda Mashruuca Biyo Galinta Muqdisho.<br>▪ Dhismaha sheybaarka baaritaanka Tayada Biyaha.<br>▪ Hirgelinta Mashruuca Biyo gelinta Magaalooyinka Kismaanyo iyo Baydhabo.<br>▪ Qodida iyo Dayactirka ku dhawaad 100 ceel oo dhaadheer kuwaas oo kamid ah mashaariicda hormarinta adeega biyaha ee degaannada fogfog ee miyiga.<br>▪ Hirgilinta Siyaasadda Fayo dhowrka Biyaha. |
| | **3. ARRIMAHA DEEGAANKA IYO YARAYNTA SAAMAYNTA ISBEDDELKA CIMILADA** | |
| **3.1** | **Ilaalinta deegaanka iyo yaraynta saamaynta arrimaha isbedelka cimilada** | ▪ Samaynta wasaarad u gaar ah arrimaha deegaanka.<br>▪ In la hir galiyo ol-ole qaran ee hirgalinta dhiraynta iyo ka hortagga nabaad guurka.<br>▪ Dhaqan gelinta siyaasadaha Maaraynta Deegaanka iyo Isbadelka Cimilada.<br>▪ Ansixinta Xeerka Maaraynta Deegaanka oo loo gudbiyay Golaha shacabka sanadkii 2021.<br>▪ Dhamaystirka iyo ansixinta siyaasada Maaraynta Qashinka.<br>▪ Dhamaystirka iyo dhaqan galinta Xeernidaamiyaha Qiimaynta Saamaynta Deegaanka, bulshada iyo dabagalka (ESIA regulation).<br>▪ Diyaarinta qorshaha qaran ee ka hortagga qashinka/sunta halista ah ee xuduudaha ka gudubta/ wadamadu isu dhoofiyaan. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Ku biirista ama ka mid noqoshada heshiiska qaaradda Afrika ee BAMAKO, kaas oo looga gol leeyahay joojinta sumaha wadamadu isu dhoofiyaan.<br>▪ Samaynta wacyi-galin qaran oo ku saabsan badbaadinta duurjoogta, xaalufinta dhirta qoyan ee dhuxusha laga sameeyo iyo dhiirigelinta isticmaalka tamaraha kale sida LPG (gaasta wax lugu karsado).<br>▪ Dhaqan galinta heshiiska caalamiga ah ee Isbadelka Cimilada (UNFCCC).<br>▪ Samaynta daraasadda Qaran ee la qabsiga Isbadelka Cimilada (National Adaptation Plan). |
| | **4. DARYEELKA IYO ILAALINTA XUQUUQDA BULSHADA** | |
| **4.1** | **Horumarinta kartida aadanaha iyo wacyi galinta bulshada** | ▪ Dhisidda Guddi isku dhaffan oo madaxbannaan mideeyana isku-dubbaridka dadaallada Horumarinta Karaanka Aadanaha (Human Capital Development).<br>▪ Curnita barnaamijyo wacyi galineed oo kobcinaya garaadka bulshada Soomaaliyeed. |
| **4.2** | **Ilaalinta iyo Daryeelka Bulshada** | ▪ Horumarnta gaarsiinta iyo joogteenta adeegga barnaamijka xanaanada danyarta (Social Safety net) iyo ka jawaabidda dhibaatooyinka sida kadiska ah ku yimaada (Shock Responsive).<br>▪ Horumarinta Nidaamka Mideysan ee Diiwaanka Bulshada (Unified Social Registry).<br>▪ Ilaalinta xuquuqda aadanaha gaar ahaan kuwa itaalka darán ee bulshada.<br>▪ Kordhinta adkeysiga bulshooyinka barakacayaasha. |
| **4.3** | **Ilaalinta xuquuqda aadanaha** | ▪ Ansixinta sharciyada iyo xeerarka la xiriira xuquueda aadanaha (xuquuqda haweenka iyo caruurta). |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Asaasidda xarun cilmi baaris lagu kordhinayo ka warqabka iyo hubinta xuquuqda aadanaha gaar ahaan haweenka iyo caruurta.<br>▪ Dib u soo howlgelinta xarumihii daryeelka caruurta iyo haweenka iyo dhameystirka siyaasadaha khuseeya. |

## TIIRKA 6aad: SOOMAALI HESHIIS LA AH DUNIDA

| | 1. HORUMARINTA SIYAASADDA ARRIMAHA DIBADDA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA AH | |
|---|---|---|
| **1.1** | **Xoojinta siyaasad miisaaman oo ku qotonta danaha dalka** | ▪ Dibu-eegista iyo Horumarinta Siyaasadda Arrimaha Dibadda ee Dalka.<br>▪ Taabagelinta Siyaasad Arrima Dibadeed miisaaman oo ku jaan go'an danaha dalka iyo dadka.<br>▪ Dib-u-habaynta hannaanka diblomaasiyadeed ee Dalka iyadoo loo marayo Sharciga Arrimaha Dibadda.<br>▪ Horumarinta iyo dhaqangalinta habmaamuuska Qaranka. |
| **1.2** | **Horumarinta xiriirka iyo iskaashiga caalamiga ah** | ▪ Horumarinta Xiriirka Dowladaha Geeska, Gobolka iyo Dunida.<br>▪ Xoojinta Iskaashiga arrimaha siyaasadda, amniga, ganacsiga, iyo maalgashi ee gobolka iyo dunida.<br>▪ Dib u uruurinta, kaydinta iyo dabagalka dhammaan Heshiisyada ay Soomaaliya qaybta ka tahay.<br>▪ Xoojinta doorka ay Soomaaliya ku leedahay urur goboleedyada sida UN, AU, OIC, IGAD, Jaamacada Carabta, iyo Hay'adaha caalamiga ah.<br>▪ Xoojinta xiriirka iyo iskaashiga horumar iyo ganacsi ee wadammada aan saaxibka nahay. |

| | | |
|---|---|---|
| 1.3 | **Xoojinta xiriirka jaaliyadaha Soomaaliyeed** | ▪ Dibu-eegista iyo ansixinta Siyaasadda Xiriirka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee wadanka dibaddiisa ku nool.<br>▪ Joogtaynta xiriirka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee wadanka dibaddiisa ku nool.<br>▪ In la sameeyo xiriir joogta ah oo ay jaaliyaduhu la yeeshaan dowlada Soomaaliyeed si udub dhexaad ay ugu noqdaan arrimaha horumarka dalka, loogana faa'iidaysto fursadaha ka jira wadamada ay ku nool yihiin.<br>▪ In la joogteeyo gurmadka loo fidinayo muwaadiniinta dibadda ku dhibaataysan. |

*Dhammaad*

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA

SOOMAALIYA